Naxwaha carabiga oo kooban

Qore Siciid Maxamed Axmed "Siciid Al-Afgaani"

Turjume Cabdirisaaq Maxamed Cilmi
"ina Warfaa"

Fiiro gaar ah: Fadlan tixgali aayadaha Qur'aanka ah ee qoraalkan la socda oo ha dhigin meel dayacan.

Qof kasta ayaa xaq u leh inuu daabacdo tarjamada naxwahan oo ma dhowrsana

Waxaa daabacay Kirja kerrallaan Helsinki Finland

Tusmada kitaabka bogga

Hordhaca qoraha---------- 7
Hordhaca turjumaha---------- 8
Falalka----------11
Rogrogmadka---------- 12
Labada fal ee layaabka---------- 13
Falalka amaanta iyo amaandarada---------- 14
Falka aan qaadan asal ahaan xarfaha------- 15
Falalka makordhaha iyo kordhaha---------- 16
Hamzada dhajisada iyo goynta
Adeegsiga qaamuusyada---------- 17
Falka xoojiyaha iyo maxoojiyaha---------- 19
Falka layaqaanaha
Gudbaha iyo magudbaha---------- 20
Dhamaha iyo madhamaha
Isbadalka shaqalka erayga u dambeeya---- 22
Kordhowga joogtada iyo meelaheeda----- 23

Reebka joogtada iyo meelaheeda
Gartada iyo lamagartada----------24
Magac uyaalka
Magaca gaarka ah---------- 25
Magaca muujiyaha
Magaca xiriiriyaha---------- 26
Gartada qodobka---------- 27
Makordhaha iyo kordhaha
Alifka gaaban iyo ya'da dhimanaha--------28
Labka iyo dheddigga----------29
Kooxaha iyo xeerarkeeda----------31
Yaraynta iyo xeerarkeeda----------32
Xiriirtada iyo xeerarkeeda
Magaca labashaqlanaha----------33
Magac faleedka
Asalada----------34
Magaca falaha
Magaca lafalaha
Astaanta u egtada magaca falaha
Magaca barbardhigaha---------- 35
Magaca goorta iyo magaca goobta
Magaca qalabka
Falaha magacyada---------- 36
Falaha
Utaaganaha falka
Yeelaha iyo sheegtada---------- 37

Sheegtada (runtii) iyo walaalaheed
Macnayaalka qodobyada
Lafalaha magacyada---------- 38
Lafalaha dhan
Lafalaha---------- 39
Lafalaha dartiis
Lafalaha lajira
Lafalaha goorta iyo goobta
Qaabka falka----------42
Kalasaaridda
Kabaxsanida----------44
Dhawaaqtada----------46
Meelaha lahaanshaha magaca ----------47
Xarafka meeleeyaha
Lahaanshaha labada magac----------50
Raacdooyinka----------51
Xoojinta
Tilmaamaha
La socotada---------- 52
Fasirtada---------- 53
Lasocotada caddaynta
Xarfaha macnayaalkooda
Isbadalka shaqalka erayga----------62

La soo xiriirka turjumaha ee ku saabsan naxwaha

Haddii aad xiiseyneysid kitaabkan oo aad dooneysid inaad ogaato sidii lagu heli lahaa, iyo haddii aad ku aragtid khaladaad xagga tarjamada ah, Eebbe kaliya ayaa dhamaystirane ha kaa abaalmariyo. Waxaad fadlan kala soo xiriiri kartaa cinwaankiisa bariidka xaasuubka:

”elab@suomi24.fi”.

Mahadnaq

Waxa aan ugu horrayntii u mahadnaqayaa Eebbe, oo igu galadaystay nimcooyin tira badan oo aanan koobi karin. Ka dibna waxaan u mahadnaqayaa dhammaan dadkii igu caawiyey talo, fikrad, dhiiragalin iyo sida habka wax loogu qoro xaasuubka "kombiyuutarka" gaar ahaan macalin Jaamac. Waxaan idin leeyahay جزاكم الله خيرا .

Taariikh nololeedka qoraha oo kooban iyo tixraac qoraal

Naxwaha carabiga waxaan ka turjumey naxwaha la yiraahdo "xeerarka afka carabiga oo kooban"

الموجز في قواعد اللغة العربية

ee uu qorey Siciid Maxamed Axmed oo loo yaqaan "Siciid Al-Afgaani". Mana wada turjumin naxwahaasi ee waan soo koobay. Siciid Al-Afgaani wuxuu ahaa naxwe-yaqaan. Wuxuu ku dhashay Dimishiq Suuriya, inkastoo uu ka soo jeedey Afganistaan, sanadka Hijriga markuu ahaa 1327dii, wuxuuna ku dhintay Makka Almukarrama Sacuudiga sanadkii 1417dii, Eebbe ha u naxariistee. Wuxuuna leeyahay kutubo dhowr ah oo uu ka mid yahay naxwahan.

Hordhaca qoraha

Labaatan sano ayaan ahaa madaxa manaahijta culuunta afka carabiga iyo dhaqangelintooda anigoo markaas ahaa ustaaz "bare" ka dhiga jaamacadda Dimishiq naxwaha "xeerarka afka" iyo sarfiga "rogrogmadka afka". Ka dibna waxaan bare ka ahaa jaamacadda Lubnaan iyo jaamacadda Beyruut anigoo dhigayey isla labadaas maaddo oon kor ku soo sheegey. Waxaana isla xiligaasi la socdey manaahijta jaamacadaha Masar iyo Ciraaq ee maadadaasi.
Naxwaha carabiga oo kooban waxaan ka qorey naxwaha afka carabiga ee uu qorey Xafni Naasif iyo naxwaha afka carabiga ee uu qorey Al-Galaayiini iyo daliilyo aan ku jirin labadaasi naxwo oo aan ku biiriyey.
Waxaan go'aansadey dabcaddan ugu dambeysey inaan mideeyo manaahijta jaamacadaha carabta si uu ugu ahaado aqoonyahanka tixraac dhan oo naxwaha carabiga ah (xeerarkeeda نحوها iyo rogrogmadkeeda صرفها).
Waxaan Eebbe ka baryayaa howsha aan qabanayo inuu ka dhigo mid waxtar leh dhamaantanada ha naga dhigo adeegayaasha afkan sharafta leh una

qalma iney mutaan adeegeeda Eebbaana nagu filan wax la talosaartana isagaa ugu wanaagsan.

Qoraha
6.11.1390 H. oo ku aaddan 2.1.1971 M.

Hordhaca turjumaha

Waxaan ku bilaabayaa magaca Eebbaha Naxariistaha guud Naxariistaha gaar.

Waxaa mahad iska leh Eebbe, nabadgalyadiisana korkooda ha ahaato adoomadiisa uu doortay. Kani waa naxwaha carabiga, ulajeedadaydu waxay tahay in aan ugu dhawaado Eebbe, aniga oo ugu turjumaayo naxwaha carabiga afka soomaaliga ardayda, maxaa yeelay waa iridda laga galo afka carabiga, taasoo ah afka nabigeena Maxamed naxariista Eebbe iyo nabadgalyadiisa korkooda ha ahaatee isaga iyo reerkiisa iyo intii raacdey dhamaantood, waana afka Qur'aanka kariimka.

Waxtarka ay leedahay barashada naxwaha afka carabiga, si sax ah ayaad ugu hadli kartaa, u qori kartaa afka carabiga, si sax ah ayaad u baran

kartaa Qur'aanka kariimka iyo Xadiiska Nabiga n.n.k., waana labada ay ku dhisan yihiin sharciga Islaamka.

Waxaana ku tala jiraa markuu soo baxo tarjamadan naxwaha ah, ka dib inaan soo saaro tarjamada qaamuuska carabiga oo kooban, hadduu Eebbe yiraahdo.

Waxaan ugu dambayntii Eebbe ka baryayaa in uu aniga "turjubaanka", qoraaga naxwahan iyo intii i caawisayba uu miisaanka wanaagyadeena noogu daro maalin aysan xoolo iyo caruur waxba tarayn.

Sida la og yahay qofkii ugu horeeyey ee qora naxwaha carabiga wuxuu ahaa Abul Aswadi Addualiyyu, waxaana faray inuu qoro madaxweynihii afaraad ee muslimiinta Cali binu abii Daalib Eebbe ha ka raali noqdee.

Diinta Islaamku waxay qabtaa " فرض الكفاية" inuu barto naxwaha carabiga qofkii awoodo.

Erayga naxwe af carabi ahaan dhowr macno ayey leedahay sida: dhinac iyo la mid.
Erayga naxwe ereybixin naxwe ahaan waxaa lool

jeedaa xeerka barashada afka.

Turjumaha
Helsinki talaado 18.9.1427 H. oo ku aaddan
10.10.2006 M.

بسم الله الرحمن الرحيم

Falalka الأفعال

Ismabadalaha iyo isbadalaha الجامد والمتصرف

Falalka badankood waxay leeyihiin saddax qaab: tagtada الماضي , joogtada المضارع , iyo fartada الأمر sida: qoray كتب , aqriyay قرأ , ogaaday علم iwm. Falalkaasi mid ka mid ah wuxuu isubadalaa saddaxda qaab sida: qoray كتب , qora يكتُبُ , qor اكتُبْ . Falalka qaarkoodna waxay isubadalaan laba qaab: tagtada iyo joogtada oo kaliya sida falkan oo kale weli ahaa ما زال , weli yahay ما يزال oo ma laha falkan qaabka saddaxaad ee fartada. Qaarna waxay isubadalaan hal qaab, falkaasi ayaana la yiraahdaa ismabadalaha. Waana inuu ahaadaa qaabka tagtada oo kaliya sida: ma aha ليس oo isuma badala labada qaab ee kale ee falka joogtada iyo fartada ama waa inuu ahaadaa qaabka fartada oo kaliya sida: ka soo qaad هب oo isuma badala labada qaab ee kale ee falka joogtada iyo tagtada.

Rogrogmadka التصرف

Tan koowaad: marka falka tagtada uu isubadalayo falka joogtada:
B) Waa inuu qaataa mid ka mida xarafyada joogtada (alifka ama hamzada qofka hadlaya kaligiis: aniga الهمزة للمتكلم وحده , ama nuunka qofka la hadlaya qofka kale: annaga النون للمتكلم مع غيره , ama ya'da qofka maqan: isaga الياء للغائب , ama ta'da dadka lala hadlayo: idinka التاءُ للمخاطبين , ama ta'da qofta maqan: iyada الغائبة .) waa la godayaa falka afarta xaraf ka kooban kan kalana waa la kordhobayaa.
T) Dabadeed waxaa la eegayaa falka inta xaraf uu ka kooban yahay:
1) Hadduu yahay fal saddax xaraf ka kooban الثلاثي , xarafka ugu horeeya waa la reebayaa يسكن , xarafka labaadna waxaa lagu shaqlayaa يحرك god ضمةً , ama kordhow فتحةً , ama hoosdhow كسرةً sida: qora يكتُب , fura يَفْتَحَ , garaaca يضرب .
2) Hadduuna yahay fal afar, shan iyo lix xaraf ka kooban الرباعي, الخماسي والسداسي , uusan ka bilaabanayn ta'da dheeraadka ah التاءُ الزائدة , waa la hoosdhabayaa ka hor xarafka u dambeeya, mana qaadanayo alifka dhajinta ألف الوصل ee falka shan iyo lix xaraf ka kooban iyo hamzada

goynta dheeraadka ah همزة القطع الزائدة ee falka afar xaraf ka kooban sida: Wareejiya اُدَحْرج , socda يَنطلِق , dembidhaaf weydiista يستَغْفِر . Haddii ay ku bilaabato ta'da dheeraadka ah, ismabadalayso: ka qaybqaatay, ka qaybqaata تشارَكَ يتشارك .
Tan labaad: marka falka joogtada uu isu badalayo falka fartada:
1) Waa la reebayaa falka joogtada ah: Ma uusan qorin لم يكْتبْ , ma uusan tuurin لم يَرْم , ma uusan wareejin لم يدَحرجْ .
2) Waa in laga tuuraa xarafka joogtada.
3) Waa inuu qaataa alifka dhajinta iyo hamzada goynta, labadaasoo uusan qaadan markuu falku yahay joogto sida: qor اكتبْ , wareeji دحْرجْ iyo socda انطلقوا .

Labada fal ee layaabka فعلا التعجب

Marka la muujinayo layaabka waxaa la adeegsanayaa labadan qaab midkood:
1) Yaa ka yaab badan ما أفْعَلَه
2) Yaa ka yaab badan أفْعِلْ به
Sida yaa ka nasiib badan ما أحسن حظَّه ama أحسنْ بحظه. Falka layaabka ee hore waa la kordhobayaa falka labaadna waa la hoosdhobayaa ba'da

dheeraadka ah darteed.

Falalka amaanta iyo amaandarada أفعال المدح والذم

Falalka amaanta iyo amaandarada dhamaantood waa falal aan isbadalin mana laha joogto iyo farto toona. Waana labo jaad:
B) Jaadka koowaad: Alla wanaagsanaa نعم , alla muxuu hoogey بئس , alla xumaa ساء , alla wanaagsanaa حبذا iyo alla mawanaagsana لا حبَّذا.
1) Marka aad wax amaaneyso ama aad ku sheegeysid amaandarada waa inuu qaataa qodobka (أل) sida: Alla muxuu wanaagsan yahay ninka Khaalid ah نعم الرجل خالد , alla maxay xun tahay ina walaasha reer Saliim بئس ابن أخت القوم سليم .
2) Ama magac uyaal kalasaare sida: Alla dabeecad xumaa xanaaqaaga ساءَ خلقاً غضبك.
3) Ama erayga (ما) sida: Alla xumaa wuxuu sameeyay dariskaa بئس ما فعل جارك , alla muxuu xumaa wixii ay sameeyeen ساءَ ما كانوا يصنعون.
T) Jaadka labaad: Sidoo kale kolkii aad wax amaaneyso ama aad ku sheegeysid amaandaro waxaad adeegsaneysaa qaabkan (فعُل) oo waxaad godeysaa erayga xarafkiisa labaad sida: Alla

garasho ogaa inanka (فهُم الطفل).

Falka aan qaadan asal ahaan xarfaha isbadala iyo kan qaata الصحيح و المعتل

Falka aan qaadan asal ahaan xarfaha isbadala waa sida qoray (كتب). Kan qaata asal ahaan xarafka ugu horeeya xarfaha isbadala waa مثال sida: Balanqaaday وعد, xarafka iskabadala xarafka dhexdiisana waxaa la yiraahdaa أجوف hadduu woow ama ya' yahay sida: Yiri yiraahda قال يقول, gaday gada باع يبيع , hadduu iskabadalo xarafka saddaxaadna waa ناقص sida: Weerarey, tuurey (غزا ورمى), haddiise iskabadala xarafka hore iyo kan saddaxaad waa لفيف مفروق sida: Gutay (وفى), haddiise iskabadalo xarafka labaad iyo saddaxaad waa لفيف مقرون sida: Dhamaaday (طوى).
Ka hamzaysan المهموز waa erayga xaraf ka mida uu yahay asalkiisa hamzo haba ahaadee kan xarfihiisu isbaddalin صحيح iyo kan isbaddalaba معتل sida: Qaatay أخذ, arkay رأى, aqriyey قرأ iyo doonay شاء .
Ka labalaabmana المضعف waa sida: Adkeeyay "shadda" (شدّ).
Falka aysan xarfihiisu isbadalin hadduusan wadan

hamzo iyo labalaab waxaa la yiraahdaa سالم sida: Gargaaray (نصر).
المثال الواوي : Ka xarafkiisa hore isbadala waxaa la hoosdhabayaa xarafkiisa labaad ee joogtada waxaa laga tuurayaa woowgiisa markuu yahay joogtada iyo fartada sida: Balanqaadey, balanqaada iyo balanqaad ((وعد، يعِد، عِدْ)).

Falalka makordhaha iyo kordhaha
المجرد والمزيد من الأفعال

Falka xarfihiisa oo dhami asal yihiin oo uusan wadan xaraf dheeri ah sida qoray كتب ayaa waxaa la yiraahdaa falka makordhaha. Falka kordhaha ahina waa kan lagu kordhiyey xaraf iyo wax ka badan sida: Isu qora كاتَب.

Hamzada dhajisada iyo goynta
همزة الوصل وهمزة القطع

Hamzada dhajisada waa sida: Wuu maqan yahay Muxsin (غاب المحسنُ) oo ba'da ayaa waxaa lagu dhajinayaa laamka reeban oo lama aqrinayo alifka ka horeeya, inkastoo uu qoran yahay.

Hamzada goyntase waa sida: Tixgeli walaalkaa أكرمْ أخاك oo waxaa loo aqrinayaa siday u qoran tahay.

Adeegsiga qaamuusyada استعمال المعجمات

Kolkii aad barato falalka makordhaha iyo kordhaha, waxaa kuu fududaanayso inaad ka raadsato eraygaad doonayso qaamuuska carabiga iyo adigoo raacaysid labadan arrin ee soo socda:
B) 1) Ka bixi eraygaad dooneysid waxa uu wato oo sumadaha joogto ama alifyada dhajinta ama magac uyaalo ama xarfaha meeleeye ama sumadaha dheddig ama koox ama labaadle.. iwm. dabadeed ka bixi xarfaha dheeraadka ah intuu ka noqonayo erayga xarfaha makordhaha ah kolkaas ayaad ka baareysaa qaamuuska macnaheeda. Tusaale eraygan المتدارك haddii aan ka bixino xarfaha dheeraadka ah waxaa noo soo baxaya درك oo ah erayga asalkiisa.
2) Waxaa lagu celinayaa xarafkii laga tuurey erayga ee uu lahaa asal ahaan marka laga raadinayo qaamuuska sida: Ina ابن oo waxaa laga tuurey woowgii: بنو oo markaanu raadineyno wuxuu noqonayaa (ب ن و).

T) Waxaa looga raadiyaa erayada qaamuusyada carabiga labadan qaab midkood:
Qaabka koowaad: Xarafka koowaad ee erayga waxaa la yiraahdaa باب xarafka u dambeeyana فصل sida:

درك باب الدال فصل الكاف

Qaamuuska ugu caansan ee sidan u qoran waa مختار الصحاح ee uu qorey الرازي oon ku talajiro inaan soosaaro tarjamadiisa oo af soomaali ah mardhow hadduu Eebbe yiraahdo.
Qaabka labaad: Xarafka u dambeeya ee erayga waxaa la yiraahdaa باب xarafka koowaadna فصل sida:

درك باب الكاف فصل الدال

Qaamuusyada carabiga ugu caansan ee sidan u qoran waa القاموس المحيط للفيروزآبادي iyo لسان العرب لابن منظور qaamuuskan dambana waa qaamuuska ugu weyn qaamuusyada carabiga oo dhan.
Waana in ardayga uu heystaa ugu yaraan qaamuuskan yar مختار الصحاح si uu uga faaideysto barashada afka carabiga.

Falka xoojiyaha iyo maxoojiyaha
الفعل المؤكد وغيره

Waxaa hadalka loo xoojiyaa adigoo hadalka ku celiya, dhaarta, iyo inuu qaato qodobada xoojinta sida: Xoojinta magacyada waa (إن وأنّ، ولكن ولام الابتداء), xoojinta falalkana waa (قد واللام ونوني التوكيد).
Casharkeenan wuxuu ku saabsan yahay xoojinta falka oo lagu xoojinayo nuunka culus ama kan fudud sida: Hadduusan samayn waxaan farayo runtii waan xiri oo wuxuuna noqon kuwa la hooseysiiyey { وَلَئِنْ لَمْ يَفْعَلْ ما آمُرُهُ لَيُسْجَنَنَّ وَلَيَكُوناً مِنَ الصّاغِرِينَ}.

Falka layaqaanaha iyo falka lamayaqaanaha
الفعل المعلوم والفعل المجهول

Marka weerta lagu sheego falaha falka sida: Wuxuu aqriyey Saliim casharkii, wuxuuna aqrinayaa saaxiibkiis berito (قرأ سليم الدرس، ويقرؤه رفيقه غداً) waa falka layaqaanaha, haddiise aan la sheegin falaha sida: Waxaa la aqriyey casharkii, waxaa la aqrin doonaa casharkii (قُرِئَ الدرسُ، وسيُقرأُ الدرسُ) waa falka lamayaqaanaha.

Tusaalahanna waa qaababka kala duwan ee falalka layaqaanaha iyo lamayaqaanaha:

Gudbaha iyo magudbaha المتعدي واللازم

Hadduu ku koobnaado saamaynta falka falihiisa sida: wuu seexday ilmihii نام الطفل markaasi falku waa magudbe.
Haddiise uu uga gudbo saamaynta falaha lafalihiisa sida: Wuxuu soo gatay walaalkaa kitaab اشترى أخوك كتاباً kolkaasi waxaa la yiraahdaa gudbe.

Dhamaha iyo madhamaha التام والناقص

Falalka madhamaha waxay ku jirtaa weerta magaca ah iyadoo ka dhigaysa mid waqti cayiman dhacay ama qaab cayiman u dhacay, waxayna u dhexeysaa falalka dhamaha iyo qodobada "xarfaha macnayaalka" ((أحرف المعاني)). Waana labo koox oo waaweyn kooxda "ahaa" ((كان)) iyo kooxda "sigtey" ((كاد)).
Waana kuwan soo socda labadoodaba:
Ahaa iyo walaalaheed كان وأخواتها:
Ahaa كان , noqdey iyo "waabereystey" أصبح ,

noqdey "barqadsadey" أضحى , noqdey "socdey" ظل , noqdey "fiidsadey" أمسى , noqdey "dhaxay" بات sida: Waxaan ku waabereystey anigoo caafimaad qaba أصبحت بارئاً , mar marna goor go'an ma sheegto sida waaberiga الصباح , fiidka المساء oo waxaa lagala jeedaa "noqdey".

"Inta" دام waxaa loo adeegsadaa qaab gooni ah sida: Aqri inta aad firfircoon tahay أقرأ ما دمتُ نشيطاً , waxaana horteeda galeysa "waxa" ((ما)).

Erayadan ((برح، انفك، زال، فتئ، رام، ونى)) oo dhan macnohoodu waa weli. Waa inse hortooda ahaataa diidmo xaraf ama magac ama fal ama diido iyo dhawaaqto sida: Weli walaalkaa wuu xanaaqsan yahay ما زال أخوك غاضباً , weli waad xasuusataa balankaagii لا تفتأ ذاكراً عهدك, weli waxaan ahay dagaal yahan أنا غير بارح مجاهداً .

Noqdey ((صار)) sida: wuxuu noqdey biyihii baraf صار الماءُ جليداً.

Ma aha ((ليس)) sida: Ma tegayo لست منصرفاً , ma imaanayaan ardada berito ليس الطلاب بقادمين غداً .

Waxaa kaloo jira afar xaraf oo loo adeegsado diidmada waana ((إنْ، ما، لا، لات)) sida:

Ma aha walaalkaa socdaale إنْ أخوك مسافراً oo la mida (إنْ أخوك إلا مسافرٌ - إن مسافرٌ أخوك).

Ma nihin gafayaal ما نحن مخطئين oo la mida (ما نحن إلا مخطئون - ما مخطئون نحن - ما إن نحن مخطئون).

Qof ma jiro Khaalid ah لا أحدٌ خالداً oo la mida لا خالدٌ أحد .

Wey shalaayeen mana jirto saacad la shalaayo ندموا ولات ساعةً مندم .

Sigtey iyo walaalaheed كاد وأخواتها:

Falalka dhowaanshaha (أفعال المقاربة): كاد، كرب، أوشك: Waan ku soo gaari rabey كدت ألحقك , roobku wuu di'i rabaa كرب المطر يهطل.

Falalka filashada (أفعال الرجاء): عسى، حرى، اخلولق: waxaa laga yaabaa inuu Eebbe caafimaad ku siiyo عسى الله أن يشفيك , waxaa laga yaabaa in dhibka laga qaado اخلولق الكرب أن ينفرج.

Falalka bilaabashada (أفعال الشروع): "Iwm شرع، أنشأ، طفق، قام، هبَّ، جعل، علِق، أخذ، بدأ، انبرى " إلخ sida: Waxay bilaabeen beeraleydii iney goostaan طفق الزراع يحصد , waxay bilaabeen tartamayaashii iney ordaan انبرى المتسابقون يعْدون .

Isbadalka shaqalka erayga u dambeeya iyo ismabadalka erayga الإعراب والبناء

Isbadalka shaqalka erayga u dambeeya oo ay ku xiran tahay halka uu kaga jiro weerta ayaa la yiraahdaa: الإعراب. Ismabadalka erayga u dambeeya oo qaab kaliya oo aysan ku xirnayn

halka uu kaga jiro hadalka ayaa la yiraahdaa: البناء.

Kordhowga joogtada iyo meelaheeda
نصب المضارع ومواضعه

Falka joogtada wuxuu noqon karaa mid hadda la joogo iyo mid soo socda, hadduu qaato mid ka mida xarfaha wax kordhaba ((((أن، لن، كي، إذن)). Laba mid ayaa dhacayso mid waxaa la kordhabayaa ba'da oo ah xarafka u dambeeya sida: Ma tegayo (لن أذهبَ), hadduu yahay falalka shanta ah halkii la kordhobi lahaa ma qaadanayo xarafka nuunka: Ma tegeysaan (لن تذهبوا..). Midda kalena wuxuu noqonayaa xaraf tilmaamaya wax dhici doona.

Reebka joogtada iyo meelaheeda
جزم المضارع ومواضعه

Reebka joogtada waxaa la reebayaa xarafka u dambeeya hadduu erayga yahay kaan isbadalin sida: Ma uusan socdaalin (لم يسافرْ), waxaa laga tegayaa xarafka u dambeeya hadduu yahay erayga isbadala sida: Ha tuurin (لا ترم), waxaana laga

tegayaa nuunka hadduu yahay falalka shanta sida: Ha daahina (لا تتأخروا).

Gartada iyo lamagartada المعرفة والنكرة

Magac kasta oo loogu yeero wax gaar ah ayaa la yiraahdaa garto sida: Adiga أنت , Beyruut بيروت .
Magaca aan loogu yeerin wax gaar ah waxaa la yiraahdaa lamagarto sida: Nin رجل iyo ina boqor أمير .
Gartooyinka waa toddobo magac uyaalka, magaca gaarka ah, magaca muujiyaha, magaca xiriiriyaha, gartada qodobka (ال) iyo haddii loo geeyo garto iyo gartada dhawaaqtada ah.

1. Magac uyaalka الضمير

Magac uyaalka waa sida: Aniga أنا , adiga "labka" أنت , adiga "dheddig" أنتِ , labadiina أنتما , idinka أنتم , idinka "dheddig" أنتن , isaga هو , iyada هي , labadooda هما , iyaga هم , iyaga "dheddig" هنَّ , annaga نحن .

2. Magaca gaarka ah العلم

Waa magac si gooni wax loogu yeero sida: Khaalid خالد , Abuubakar أبو بكر , Dimishiq دمشق, Ummu xabiiba أم حبيبة .

3. Magaca muujiyaha اسم الإشارة

Magacyaalka muujiyaha waa kuwan:
Kuwa labka ah: Kani ذا, labadan ذَيْن iyo ذان , kuwaasi أُولاءِ .
Kuwa dheddiga ah: Tani ذِهْ , تِهْ , ذي , تي . labadan تان iyo تَيْن , kuwaasi أُولاء .
Halka goobta: Halkan هنا , halkaasi ثَمَّ iyo ثَمَّةَ .
Magacyadan waxay qaataan ha'da soojeedista ((ها التنبيه)) , waxaan ka ahayn (ثمة) sida: Kani هذا , kuwaasi هؤلاء , halkani ها هنا.
Muujiyahaasi waxaa gadaal ka raaca kaafka qofka lala hadlayo xarafkaasi oo qaata kaafka magac uyaalka keliga, labaadlaha, kooxda, labka iyo dheddiga sida: Buurtaasi ayaa halkaasi ah ذاك الجبل هناك , wargeysyadiinan waa kuweenii تيكم الصحيفة لنا , kuwiinan waa wixii aad codsateen ذا كُنّ ما طلبتُنّ iyo kuwiinan waa wixii aad codsateen ذاكم ما طلبتم.
Waxaa kaloo ay qaadataa laamka muujiyahiisu ay

tahay fogaanshaha sida: Halkaasi buurtaasi agteeda هنالك عند ذلك الجبل , wargeyskaasi waa keygii تلك الصحيفة لي.
Waxaa loo dhexeysiiyaa magac uyaal soojeedinta ((ها)) iyo magaca muujiyaha sida: Waa aniga kan ها أنذا , waa idinka kuwaasi ها أنتم أولاء sida badana waxaa loo dhexeysiiyaa kaafka sidii: Sidaas oo kale هكذا.

4. Magaca xiriiriyaha الاسم الموصول

Magacyada xiriiriyaalka waa laba qeybood: Qaybta xiriiriyaalka gaarka ah iyo qaybta wadaaga ah.
B) Xiriiriyaalka gaarka ah:
Kuwa labka ah: Kii الذي , labadii اللذانiyo اللذَيْن , kuwii الذين , kooxda labka ah الألى .
Kuwa dheddiga ah: Tii التي , labadii اللتان iyo اللتيْن , kuwii اللاتي, kooxda dheddiga اللائي .
T) Xiriiriyaalka wadaaga ah waana shan: Qof من , wax ما , kii أيُّ , kii ذا , kii ذو
1) من , Waxaa loo adeegsadaa wixii garaad leh iyo waxaan lahaynba sida: Wanaaji qoftii ku nuujisey أحسن لمن أرضعتك .
Eebbana wuxuu ka abuuray xoolo kasta biyo qaar

ka mida waa xamaarato qaarna waa laba lugoodle qaarna afar lugoodle { وَاللَّهُ خَلَقَ كُلَّ دابَّةٍ مِنْ ماءٍ فَمِنْهُمْ مَنْ يَمْشِي عَلَى بَطْنِهِ وَمِنْهُمْ مَنْ يَمْشِي عَلَى رِجْلَيْنِ وَمِنْهُمْ مَنْ يَمْشِي عَلَى أَرْبَعٍ}.

2) ما , Waxaa loo adeegsadaa wixii garaad leh iyo waxaan lahaynba sida: Keen wixii aad heyso أحضر ما عندك , u qeybi ardadaada laba koox صنّف ما عندك من الطلاب صنفين.

3) أيُّ , Waxaa loo adeegsadaa garaadlaha: La kulan kii aad jeceshahay قابلْ أيًّا أحببته.

4) ذا , Wuxuu noqdaa magac xiriiriye hadduu ka hormaro weydiinta ((ما)) ama ((منْ)) .

5) ذو , Waxay gaar u tahay lahjada qabiilka طيء sida: Waxaa yimid kii ku sharfay جاء ذو أكرمك .

Gartada qodobka (ال) المعرف بـ

Magaca gartada wuxuu qaataa oo lagu yaqaan gartada ((ال)) .

Makordhaha iyo kordhaha المجرد والمزيد

B) Magaca ka maran xarafka dheeraadka ah asalkiisa ayaa la yiraahdaa magaca makordhaha,

wuxuuna u kala baxaa saddax:
1) Makordhaha saddax xaraflaha ah sida: Nin رجُل .
2) Makordhaha afar xaraflaha ah sida: Jacfar جَعْفَر .
3) Makordhaha shan xaraflaha ah sida: Geed mirihiisu sidii cambaruudka سفَرْجَل .
T) Magaca kordhaha waa kan lagu kordhiyo asalkiisa xaraf iyo wax ka badan: kordhintana waa laba jaad:
1) In la soo celiyo xaraf ka mida xarfihiisa asalka ah sida: Jilbaab جلْباب asalkeeda "جلب" .
2) In lagu kordhiyo mid ka mida xarfaha dheeraadka tobanka ah oo ay wada yihiin xarfahan: (سألتمونيها) sida: Kulan اجتماع asalkeeda "جمع" .

Alifka gaaban iyo ya'da dhimanaha iyo hamzada ladheereeyay المقصور والمنقوص والممدود

1) Alif gaabka waa magac kasta oo isbadala oo ku dhamaado alif sida: Wiilka الفتى .
Waana alifka iskaroga asalkiisa woowga ah ama ya'da, tusaale ahaan alifka الفتى asalkiisu wuxuu ahaa ya' oo wuxuu muuqdaa kolkuu yahay kooxda

labada ah sida: Laba wiil فَتَيَان , alifkana العصا asalkiisu wuxuu ahaa woow sida: Labo ul عصوان.
2) Ya'da dhimanaha waa magac kasta oo isbadala oo ku dhamaado ya' sida: Garyaqaanka المحامي .
3) Erayga xarfihiisu ismabadalaha ah ee ladheereyn waa sida: Geel جمل . Eraygase xarfihiisu ismadalaha ah ee ladheereeyey waa magac kasta oo isbadala oo ku dhamaada hamzo alifka dheeraadka ah ka dib sida: Naag quruxsan حسناء .

Labka iyo dheddigga المذكر والمؤنث
Toosanaha - dadbanaha - xaraf ahaanta - fasirnaanta

الحقيقي - المجازي - اللفظي - المعنوي

Toosanaha iyo dadbanaha:

Magaca labka ee dadka iyo xoolaha oo u kala baxa lab toosane sida wiil غلام iyo dawaco "lab" ثُعْلُبان. Iyo magaca dheddiga ee dadka iyo xoolaha oo u kala baxa dheddig toosane sida gabar بنت iyo أتان dameerta.

Dheddigga xaraf ahaanta iyo dheddigga fasirnaanta المؤنث اللفظي والمؤنث المعنوي:

Dheddigga xaraf ahaanta waa magac kasta oo qaata mid ka mida sumadaha dheddiga waana ta' yarta, alifka gaaban iyo alifka dheer ((التاء المربوطة والألف المقصورة والألف الممدودة)) , waxaase jirta mar ay muujineyso labnimo sida: Dalxa iyo Zakariye طلحة وزكرياء "magac nin" .
Dheddiga fasirnaanta waa magac kasta oo qaadan mid ka mida sumadaha dheddiga sida: Sucaad سعاد .

Sumadaha dheddiga saddaxda ah علامات التأنيث الثلاث:

1) Sumadda koowaad: Ta' yarta waa sida: Garyaqaanad محامية .
2) Sumadda labaad: Alif gaabka waa sida: Haraad, haraadsan tahay عطشى :عطشان .
3) Sumadda saddaxaad: Alifka dheer waa sida: Jaale, jaaley tahay صفراء :أصفر.

Kooxaha iyo xeerarkeeda
الجموع وأحكامها

Keliga waa wax hal ah sida darbiga جدار , gabar فتاة , qaran أمة , labadana waa wax labo ah المثنى isku mida qoraalka iyo macnaha iyadoo lagu darayo alif, nuun ama ya' iyo nuun sida: Labo gabdhood فتاتان, kooxdana waa wixii labo ka badan isagoo iskabadalaya qaabkii keliga ama qaata xarfo dheeraad ah sida: Muuqaal: muuqaalo صُورة: صُور , guuleyste: guuleystayaal ناجح: ناجحون iyo gabar: gabdho فتاة: فتيات .
Kooxaha waa saddax kooxda labka toosanaha جمع مذكر سالم , kooxda dheddiga toosanaha جمع مؤنث سالم iyo kooxda matoosanaha جمع تكسير .

1) Kooxda labka toosanaha
جمع المذكر السالم

Waa wixii ka badan laba oo lagu daro woow iyo nuun qaabka falaha sida: Kuwaasi waxay isku raaceen ganacsigooda (هؤلاء موفقون في تجارتهم) ama ya' iyo nuun qaabka lafalaha iyo lahaanshaha.

2) Kooxda dheddigga toosanaha جمع المؤنث السالم

Waa wixii ka badan laba oo lagu daro alif iyo ta' sida: Way aqriyeen ardaydii "dheddig" dadaalayey (قرأت طالبات مجتهدات).

3) Kooxaha matoosanaha جموع التكسير

Koox kasta oo iskabadasha qaabkeeda keliga ayaa la yiraahdaa koox matoosane sida: Buur: buurar جبل: جبال .

Yaraynta iyo xeerarkeeda التصغير وأحكامه

Magaca loo rogayo qaabka wax yar ((فُعَيْل)) ayaa la yiraahdaa magaca yar. Wuxuuna muujiyaa yaraanta qaradiisa sida: Kitaab-yar (كُتَيِّب).

Xiriirtada iyo xeerarkeeda النسبة وأحكامها

Haddii magac gadaashiis lagu daro sida Dimishiq (دمشق) ya'da labalaabanta ياء مشددة iyadoo la rabo inay wax la xiriirto markaasi wuxuu noqonayaa magac xiriirto sida: Kani waa tolmada reer Dimishiq (هذا نسجٌ دمشقيٌّ) .

Magaca labashaqlanaha iyo laba mashaqlanaha
الاسم المنون وغير المنون

Magacyada badankood waxay qaataan labashaqlanaha qaababka isbadaladooda oo dhami isagoo godan ama kordhoban ama hoosdhoban sida kaasi waa shimbir هذا طائرٌ , waxaan arkay shimbir رأيت طائراً , waxaan fiiriyey shimbir نظرت إلى طائر .
Magacyadase aan qaadan labashaqlanaha waa sida: Magacyo gaar, astaamo iyo magacyo xarafkooda u dambeeya yahay alifka dheddigeed ama yahay qaabka kooxda badan.

Magac faleedka iyo magac magac faleedka
المصدر واسم المصدر

Magac faleedka iyo magac magac faleedka waa sida ogaaday عِلم ogaansho عِلْماً .

Asalada المشتقات

Magacyada asalka ah waa toddobo: Magaca falaha, magaca lafalaha, astaanta u egtada, magaca barbardhigga, magaca goorta, magaca goobta iyo magaca qalabka.

1) Magaca falaha اسم الفاعل

Magaca falaha wuxuu sheegaa qofkii sameynayey falka sida: Ma wuxuu qorayaa walaalkaa casharkiisii أكاتب أخوك درسه.

2) Magaca lafalaha اسم المفعول

Magaca lafalaha waa sida: Lagaraacay مضروب.

3) Astaanta u egtada magaca falaha
الصفة المشبهة باسم الفاعل

Astaanta u eg magaca falaha waa sida: Dabeecad wanaagga كريم الخلق.

4) Magaca barbardhigaha اسم التفضيل

Waxaa lagu qaabeeyaa qaabka ka badan ((أفعل)) sida: Labadiinaba garaad ayaad leedihiin hase ahaatee deriskaa ayaa kaa garaad badan oo kaa garanaaya كلاكما ذكي لكن جارك أذكى منك وأعلم .

5) Magaca goorta iyo 6) magaca goobta اسم الزمان واسم المكان

Magaca goorta iyo magaca goobta waa sida halkan waxaa ku duugan xoolo هنا مدْفن الثروة , shalay waxaa tartamayey labo orod yahan أمس متسابَق العدّائين .

7) Magaca qalabka اسم الآلة

Waxaa loo adeegsadaa magaca qalabka qaabkan مِفْعال. Magaca qalabka waa sida: Fure مفتاح . Asalkuna wuxuu ahaa "فتح" oo ah furey.

Falaha magacyada المرفوع من الأسماء

Waa la godayaa magaca hadduu noqdo fale ama utaagane fale ama yeele ama sheegto ama magaca ahaa iyo walaalaheed كان وأخواتها iyo wixii la socda ama sheegtada in iyo walaalaheed إن وأخواتها .

Falaha الفاعل

Falaha waa qofkii sameynayey falka sida: Way aqrisey ardayadii (قرأت الطالبةُ).

Utaaganaha falka نائب الفاعل

Utaaganaha falka waa sida: Walaalkaa wuu jeexan yahay dharkiisa أخوك ممزَّقٌ ثوبُه . Macne ahaan waa lafale illeen asalku wuxuu ahaa waxaad jeexeysaa dharka walaalkaa أنت ممزِّقٌ ثوبَ أخيك.

Yeelaha iyo sheegtada المبتدأ والخبر

Weerta magaca ah waxay ka kooban tahay yeelaha iyo sheegtada sida: Khaalid waa socdaale (خالد مسافر).

Sheegtada (runtii) iyo walaalaheed خبر (إن) وأخواتها
Macnayaalka qodobyada معاني الأدوات

Macnayaalka qodobada معاني الأدوات:
((إنَّ وأنَّ)) waxay xoojiyaan weerta sida: Runtii Zuheyr baa nasoo raacaya, waxaanba runtii kuu maleeyay socdaale (إن زهيراً يصحبنا، ظننت أنك مسافر) Ayaa ka xoojisan sida: Zuheyr ayaa nasoo raacaya, waxaan kuu maleeyay socdaale (زهير يصحبنا، ظننتك مسافراً).
((كأنَّ)) Sidii iyo xoojinta sida: Waxayba muujiyeen fardooleydii wacdarooyin ineyba runtii yihiin oo kale socdaalayaal (ثبت الفرسان على الجياد كأنهم الأطواد).
((ولكنَّ)) Hase ahaatee iyo xoojin sida: Waxaa yimid ardadii hase ahaatee waxaa maqan Saliim (حضر الطلاب لكنَّ سليماً غائب), xoojintase waa sida: Haddii aad iga ogolaan lahayd waan kuu abaalgudi lahaa, adiguse runtii igama aadan ogolaan (لو استجبتَ لي لكوفئت، لكنك لم تستجب).

((ليت)) Rabitaanka sida: Haddaad na raaci lahayd (ليتك تصحبنا).
((لعل)) Sidoo kale ((علَّ)) lagayaabo waa sida: Dadaal waxaa lagayaabaa inaad ku guuleysato kolkan (اجتهد لعلك تنجح هذه المرة). Marna waxay noqotaa "si" sida: Shaqee si aad u soosaarato nololmaalmeedkaada (اعمل لعلك تكسب قوتك).
((لا)) Diidada sida: Ma jooga nin qolka (لا رجلَ في القاعة).

Lafalaha magacyada المنصوب من الأسماء

Lafalaha magacyada waa lafalaha dhan, lafalaha, lafalaha dartiis, lafalaha lajira, lafalaha goorta iyo goobta, qaabka falka, kalasaaridda, kabaxsanidda, dhawaaqtada iyo raacdada lafalaha.

Lafalaha dhan المفعول المطلق

Lafalaha dhan waa sida: Waxaan ordaa aroor kasta orod أعدو كل صباح عدْواً.

Lafalaha المفعول به

Lafalaha waa sida ma cabin walaalkaa cabitaankiisii لم يشرب أخوك شرابه , magac uyaalkana wuxuu noqdaa lafale sida waan ku sharfay أكرمتك , adiga ayaanu ku caabudaynaa إِيّاكَ نَعْبُدُ .

Lafalaha dartiis المفعول لأجله

Lafalaha dartiis waa sida waxaan u istaagay weyneyn dartaada ah قفت إجلالاً لك .

Lafalaha lajira المفعول معه

Lafalaha lajira waa sida waxaa socdaalay walaalkay aabihiisna hortii سافر أخي و أبوه قبله .

Lafalaha goorta iyo goobta المفعول فيه

Lafalaha goorta iyo goobta waa sida waxaan imid maalintii khamiista qaadiga hortiisa حضرت يومَ الخميس أمامَ القاضي , maalinta khamiista waxay tilmaantey goorta falka (يومَ الخميس), qaadiga

hortiisana waxay tilmaantey goobtiisa (أمامَ القاضي).
Falkaabyada waxay u kala baxaan rogmatada المتصرفة iyo marogmade غير متصرف.
Falkaabyada rogrogmada الظروف المتصرفة sida:
Maalinta khamiista way dhowdahay يومُ الخميس قريب.
Falkaab marogmade ظرف غير متصرف sida:
Waxaan imaan doonaa casirka ka dib سأحضر من بعد العصر.
Falkaabyada goobta ee ismabaddalaha ظروف المكان المبنية: Sida: Aad meeshii aad ka timid اذهب من حيث أتيت.
هنا - Istaag halkan قف هنا.
ثَمَّ - Fadhiiso halkaas اجلس ثَمَّ .
أين - Halkee usocdaashey? أين سافرت؟.
عل - Ma waxaad nagala hadleysaa kor? أتكلمنا من علُ؟.
دون - Kitaabka wuxuu yaalaa kitaab-saarka hoostiisa الكتاب دونَ الرف.
2) Falkaabyada goorta ee ismabaddalaha ظروف الزمان المبنية:
إذا: Goortada timaadada sida: Hadduu yimaado walaalkaa ila socodsii إذا جاءَ أخوك فأخبرني.
إذْ: Goortada tagtada sida: Kolkaasi waxay ahayd markuu dhacay dhulgariirka كان ذلك إذْ وقع الزلزال.

أيان: Wuxuu weydiinayaa goorta maalinta dagaalka يسأل أيانَ يوم المعركة.

قطُّ: Been ma aanan sheegin weligey ما كذبت قطُّ .

عوض: Ma usameyn doono wax dhaafsasho لن أفعله عوضُ .

بينا وبينما: Mar aan taagnaa ayuu yimid walaalkaa بينا أنا واقف حضر أخوك , wuxuu soo galey Khaalid mar aanu wadahadleyney دخل خالد بينما نحن نتحاور .

أمس: Wuxuu yimid ina boqorkii shalayto حضر الأمير أمس .

ريثَ: Istaag inta aan tukanayo قف ريثَ أُصلي.

لمَّا: Markuu aqriyey waan la dhacney لما قرأ أُعجبنا به .

مُذ، منذُ: Goortada tagtada sida: Fuley ma ahayn tan iyo intii aan garaadsadey ما جبنت منذُ عقلت .

ظروف Falkaabyo wadaaga goorta iyo goobta مشتركة للزمان والمكان:

أنَّى: Goormaad timid? أنَّى حضرت؟:(متى) goobtaad fadhiisato waad ku nasan أنَّى تجلسْ تسترح (أين).

عند: "Xagga" waa iga soo tegey خرج من عندي , wuxuu socdaaley gabaldhicii سافر عند الغروب.

لدى: "Heysasho" waxaan heystaa toban "diinaar" lacag ah لديَّ عشرة دنانير , wuxuu yimid kolkii qorraxdu soobexeysey حضر لدى طلوع الشمس .

لدُنْ: "Xagga" xagganaga ayaanu ka barney aqoon {وَعَلَّمْنَاهُ مِنْ لَدُنَّا عِلْماً}.

Qaabka falka الحال

Qaabka falka waa sida waxaan la kulmay hooyadaa oo faraxsan (قابلت والدتك مسرورةً) qaabkii falka waa faraxsan (مسرورة) qofkii faraxsanaa waa hooyadaa (والدتك) falihii qaabka waa (قابلَ).
Waxaa jira jaad kale oo la yiraahdo qaabka xoojinta الحال المؤكد sida: Waxaanu kuugu soo dirney dadka rasuulnimo {وَأَرْسَلْنَاكَ لِلنّاسِ رَسُولاً}.

Kalasaaridda التمييز

Kalasaaridda waa sida: Waxaan leeyahay soddon "kitaab" oo aan jeclahay (عندي ثلاثون كتاباً أنا بها قريرٌ عيناً).
Kalasaaraha wuxuu u kala baxaa kalasaaraha gaarka ah تمييز الذات iyo kalasaaraha xiriirtada تمييز النسبة .
B) Kalasaaraha gaarka ah waa sida: Qolka waxaa jooga labaatan ardey hortooda uu yahay intaasoo kitaab ah (في القاعة عشرون طالباً أمامهم كذا كتاباً).
T) Kalasaaraha xiriirtada waa sida: Anigaa ugu xoolo badan أنا أكثر مالاً .

Kalasaaraha tirada iyo udhigankeeda تمييز العدد وكناياته:

B) Tirooyinka ka bilaabata (3- 9) waxaa lala dheddigeeyaa tirooyinka labka ah, waxaana lala labeeyaa tirooyinka dheddiga ah qaababkeeda oo dhan keliga ama lagu daro ama lasocoto sida: Armaajada waxaa yaala lix wargeysyo ah iyo toddobo qalimo iyo saddax iyo toban kitaab iyo shan iyo toban warqado ah iyo siddeed iyo lixdan buug iyo afar iyo konton kaarar ah (في الخزانة ست مجلات وسبعة أقلام، وثلاثة عشر كتاباً وخمس عشرة رسالةً، وثمانيةٌ وستون دفتراً وأربعٌ وخمسون بطاقةً). Tirada tobnaadse waxay leedahay laba qaab: way isku raacaan tiradiisa haddii lagu daro mid kale sidaad aragtey saddax iyo toban kitaab, shan iyo toban warqado ah (ثلاثة عشر كتاباً، خمس عشرة رسالة) wuuse ka soohorjeedaa markuu keli yahay sida: waxaa gudbey toban arday ah iyo toban arday "dheddig" ah (نجح عشرة طلاب وعشر طالبات) kowga الواحد iyo labada الاثنان waxay ku raacaan tirada qaababka oo dhan. Sidoo kale markaanu leenahay: Maanta waa toddobo iyo tobankii Rajab هذا اليومُ السابعَ عشرَ من رجب iyo habeen dambena waa sagaal iyo toban غداً الليلةُ التاسعةَ عشرةَ .

Markii aad aqrineysid tirooyinka waxaad ka bilaabeysaa xagga midig oo waxaad leedahay

Waxay ka baxeen sanadkii kun sagaal boqol iyo shan iyo afartankii 1945: كان الجلاءُ سنة خمس وأربعين وتسعمئة وألف . T) Waxaa udhiganta tirada erayo saddax ah oo kala ah: كذا، كأيِّنْ، كم.

1) كذا : "Intaasoo" waxa la adeegsadaa kolkii aad ka hadleysid tirada ha yaraatee ama ha badnaatee sida: Waxaan heystaa intaasoo kitaab ah عندي كذا كتاباً . Waxaan arkey tuulo hebel iyo tuulo hebel رأيت كذا وكذا قريةً .

2) كأيِّنْ (كأيٍّ) "Meeqa" waxaa loo adeegsadaa waxa badan sida: Meeqa kitaab ayaad aqrisey (كأين من كتابٍ قرأت).

3) ((كم)) "Meeqa" waxaa loo adeegsadaa laba qaab: Weydiin iyo sheegto.

Weydiinta الاستفهامية waxaa la adeegsadaa kolkii aad rabtid inaad ogaato tirada sida: Meeqa lacag ah ayaad heysataa? (كم ديناراً عندك؟).

Sheegtadase الخبرية (كم) waxay sheegtaa waxa badan sida: Meeqa waano ayaa ku soodhaaftey oodan kuwaano qaadan! (بكم عبرةٍ تمرُّ فلا تتعظ!).

Kabaxsanida المستثنى

Kabaxsanidda waa sida way faaideen ganacsatadii Khaalid mooyee (ربح التجار إلا خالداً).

Qoddobada kabaxsanida أدوات الاستثناء waa siddeed: ((إلا، غير، سوى، خلا، عدا، حاشا، ليس، لا يكون)).
إلا: "Mooyee" waa xarafka kabaxsanida sida badan sida: Ma uusan imaan walaalkaa mooyee (لم يحضر إلا أخوك). Waxayna qaadataa macnaha "ahayn" ((غير)) sida: Haddii ay ahaan lahayd labadooda "cirka iyo dhulka" Eebbayaal aan ahayn Eebbe way xumaan lahayd labadoodaas { لَوْ كانَ فِيهِما آلِهَةٌ إِلاّ اللَّهُ لَفَسَدَتا}. Waxayna qaadataa macnaha "hase ahaatee" ((لكن)) sida: Kuguma aan soodejin Qur'aanka inaan kugu dhibno hase ahaatee waano qofkii cabsanaya { ما أَنْزَلْنا عَلَيْكَ الْقُرْآنَ لِتَشْقَى، إِلاّ تَذْكِرَةً لِمَنْ يَخْشَى}.
غير وسوى: Ninkan ma xuma, wuxuu leeyahay astaamo aanan ahayn waxaan kuu sheegey (هذا رجلٌ غيرُ سيءٍ، له صفاتٌ سوى ما ذكرت), waxayse qaadataa macnaha "mooyee" ((إلا)) ee kabaxsanida sida: Waanu fahamney casharkii aan ka ahayn Naziir (فهمنا الدرس غير نذيرٍ).
ما خلا، ما عدا، ما حاشا: Erayadan haddii ay lasocoto (ما) waa in lakordhobaa: Way aqrinayaan ardadu waxaan ka ahayn laba iyaga ka mida (يقرأ الطلاب ما عدا اثنين منهم).
ليس، لا يكون: Sida: Waxaa socdaaley reerkii aan ka ahayn Amiirka (سافر القوم ليس الأميرَ) ama (لا يكون الأميرَ).

((بَيْدَ)) Waa sidii kabaxsanida sida: Axmed waa nin deeqsi ah fulay inuu yahay mooyee (أحمدُ جواد بيْدَ أنه جبان)

Dhawaaqtada المنادى

Dhawaaqtada waa sida Khaalidow يا خالد , Cabdullaahiyow أيا عبد الله , mar walbana waa lakordhobayaa ka dib qodobka dhawaaqtada. Haddiise magacu aanu isbadalin sida caadiga ah, wuxuuna ahaanayaa sidiisii hore sida: Siibawayh-yahow يا سيبويه , kanow يا هذا .

1) Xarfaha dhawaaqtada أحرف النداء waa siddeed: (أ) iyo (أيْ) waxayna noqdaan dhawaaqtada dhow sida: Khaalidow, walaalkeeyow (أخالد، أيْ أخي) iyo ((يا، آ، آي، أيا، هيا)) waxayna noqdaan dhawaaqtada fog iyo (وا) waxay noqotaa gaar ahaan baroordiiqa sida: Alla madaxeey (وارأسي).

(يا): Waa tan ugu muhiimsan oo waa dhawaaqtada dhow, fog iyo gargaarsashadaba sida: Hantiilayaalow saboolka gaajada uga gargaara (يا للأغنياء للفقراء من الجوع) iyo baroordiiqa sida: Alla madaxeey (يا رأسي) iyo Alla Eebbow (يا أللهُ).

Meelaha lahaanshaha magaca مواضع جر الاسم

Lahaansho ayuu noqonayaa magacu hadduu ka horreeyo xarafka meeleeyaha ama lagu daro magac hore.

Xarafka meeleeyaha الجر بالحرف

Xarfaha meeleeyaasha waa toban iyo toddobo xaraf:

الباء، من، إلى، عن، على، في، الكاف، اللام، رُبّ، .
حتى، مُذْ، منذ، واو القسم، تاء القسم، خلا، عدا، حاشا

Waxaan ku soo sheegnay saddaxda ugu dambeeya casharkii kalasaaraha مبحث الاستثناء waana kuwan macnahooda xarfaha afar iyo tobanka dhiman:

1) الباء : Kudhejinta "toosan" sida: Waxaan qabtey gacantaada (أمسكت بيدك), ama dadban sida: Waxaan soo dhaafey gurigaagii (مررت بدارك), caawinta sida: Waxaan ku cuney qaaddo (أكلت بالملعقة), wacnaanta sida: Gardaradaada darteed ayaan kaaga goostey (بظلمك قوطعت), udhiganta sida: Uqaado kitaabka buugga ama lacag (خذ الكتاب بالدفتر أو بدينار), badalka sida: Alla yaa iigu beddelo xoolihiisa caafimaad (ليت له بماله عافية), falkaabka sida: Waxaan soodhaafey Dimishiq habeen (مررت

بدمشق بالليل), lasocotada sida: Bax adoo nabad ah (اذهب بسلام), dhaarta sida: Waxaan ku dhaartey Eebbe (أقسمت بالله).
2), 3) تاء القسم وواوه: Ta'da dhaarta iyo woowgeeda sida: Waxaan ku dhaartey Eebbe (تالله), woowgana sida: Waxaan ku dhaartey Eebbe (والله).
4) الكاف: Sidii sida: Wuxuu u ciyey sidii libaaxii (صرخ كأسد).
5) اللام: Ugaar ah sida: Eebbaa mahadda iska leh (الحمد لله), "u" sida: Waxaan u soo noqdey gurigeygii (عدت لداري), noqoshada sida: Waxay udhiseen iney burburiyaan (بنوا للخراب), falkaabka sida: Sooma "bisha" aragtideeda (صوموا لرؤيته), gargaarsasho sida: Hantiilayaalow (يا للأغنياء), layaabka sida: Heersare! (يا للروعة!).
6) عن: "Ka" sida: Waxaan ka socdaaley Beyruut (سرت عن بيروت), kadib sida: Xoogaa yar kadib wey shalayn doonaan {عَمّا قَلِيلٍ لَيُصْبِحُنَّ نادِمِينَ}.
7) في: Falkaabka toosan sida: Waxaan joogey Ramadaankii Dimishiq (أقمت في رمضان في دمشق), dadban sida: Waxaa idinkugu sugnaadey qofkii qof dila in ladilo nolol {وَلَكُمْ فِي الْقِصاصِ حَياةٌ}. Darteed sida: Waxay u gashey cadaab naag mukulaal ay xirtey darteed ((دخلت النار امرأة في هرّة حبستها)).
8), 9) مذ ومنذ: Tan iyo sida: Lama aanan hadlin tan

iyo saddax maalmood (لم أكلمه منذ ثلاثة أيام).
10) من: Bilaabashada "ka" sida: Waxaan ka baxay guriga (سرت من الدار), qaar sida: Bixiya wixii aad jeceshihiin (أنفقوا مما تحبون), caddaynta sida: Wixii xoolo ah ood heysato keen (ما عندك من مال فأحضره), beddelka sida: Wax kaaga tarimeyso doodda runta (لا يغنيك الجدل من الصدق شيئاً), darteed sida: Dadaal xumadaada darteed ayaad ku jabtey (من تقصيرك خسرت).
11) إلى: "Tan iyo, ku" Dhamaadka sida: Waxaan soojeedey tan iyo waaberigii (سهرت إلى الفجر). Xagga عند sida: Aqriska ayaan ka jeclahay xaggeyga hadalka (القراءة أحب إلي من الحديث).
12) رُبّ: Lagayaabo sida: Waxaa lagayaabaa inuu dhibnoo yahay (رب مؤذٍ لنا).
13) على: Kor "toosan" sida: Kitaabka wuxuu kor saaran yahay kitaab-saarka (الكتاب على الرف) ama dadban sida: Abaal ayaad igu leedahay (لك عليّ فضل), darteed sida: Wuu isharfey wixii aan u sameeyay darteed (أكرمني على نفعي له), lasocotada مع : Waan ku jeclahay caajisnimadiisa (أحبه على كسله), inkastoo sida: Waan ku jabey heshiiskii inkastoo aanan ahayn rajolaawe (خسرت الصفقة على أني غير يائس).
14) حتى: Dhamaadka "tan iyo" sida: Waxaan soojeedey tan iyo waaberigii (سهرت حتى الصباح),

darteed "si" waxay la macno tahay laamka مرادفة اللام sida: Dadaal si aad uguuleysato (اجتهد حتى تفوز).

Lahaanshaha labada magac الجر بالإضافة

Lahaanshaha waa labo magac oo isla socda sida iikeen kitaabka Saciid iyo qalin qoriga (أحضرْ كتاب سعيد وقلم حبر).
Lahaanshaha waa laba jaad: Lahaanshaha meeleeyaha iyo lahaanshaha erayga:
Lahaanshaha meeleeyaha الإضافة المعنوية:
Lahaanshaha meeleeyaha waxay qaadataa mid ka mida saddaxda xarfaha meeleeyaha:
1) اللام Waxay tilmaantaa lahaansho ama ugaar ah sida: gurigeygii = guri keygii (داري = دارٌ لي).
2) ((من)) Waxay tilmaantaa caddayn sida: ushan waa geedka Khayzaraan (هذه عصا خيزرانٍ = هذه عصاً من خيزران).
3) ((في)) Waa falkaab sida: Waxaa iddaaliyey soojeedkii habeenkii iyo ilaalinta beeraha (أتعبني سهر الليل وحراسة الحقول = سهرٌ في الليل وحراسةٌ في الحقول).
Lahaanshaha erayga الإضافة اللفظية:
Lahaanshaha erayga waa sida: Waxaa isoo

dhaafay nin madaxiisa daboolnaa مرَّ بي رجلٌ معصوبُ الرأس .

Raacdooyinka التوابع

Hadduu raaco erayga isbadalka erayga ka horeeyay ayaa la yiraahdaa raacdo تابع .
Raacdooyinka waa shantan: Xoojinta التوكيد , tilmaamaha النعت , la socotada العطف , fasirtada البدل , la socotada caddaynta عطف البيان .

1- Xoojinta التوكيد

Xoojinta waa eraygii oo la soo celiyey mar kale sida: Waa la heshiiyey waa la heshiiyey لقد تم الصلح لقد تم الصلح.

2- Tilmaamaha النعت

Tilmaamaha wuxuu sheegaa qofka yimid wuxuu yahay sida: Waxaa yimid Khaalid gabyaagii حضر خالدٌ الشاعرُ .

3- La socotada العطف

La socotada waxay wada socodsiisaa laba eray iyadoo ka dhigaysa isku shaqal ama reeb sida: Waxaa aqriyey ardadii "labka" haddana ardadii "dheddigga" ka dibna ilmihii قرأ الطلابُ فالطالباتُ ثم الأطفالُ.

Xarfaha la socotada waa sagaalkan soo socda:

1) الواو: "Iyo" waa sida: Waxaa socdaaley Axmed iyo Saliim (سافر أحمد وسليم).

2) الفاء: "Ka dib" waa sida: Waxaa socdaaley Axmed ka dibna Saliim (سافر أحمدُ فسليمُ).

3) ثم: Dabadeed waa sida: Waxaa socdaaley Axmed dabadeed Saliim (سافر أحمد ثم سليم).

4) حتى: "sidoo kale" sida: Waxaan cuney malaaygii sidoo kale madaxiisii أكلت السمكة حتى رأسَها .

5) أو: "Ama" sida: Waxaa wanaagsan inaad isku mashquulsid aqriska ama ciyaaraha يحسن أن تشغل نفسك بالقراءة أو الرياضة.

6) ((أم)) "Mise" sida: Ma adigaa guuleyste mise walaalkaa? أأنت الناجح أم أخوك؟ .

7) بل: "Ee waa" sida: Ma socdaalin deriskaa ee waa adeegahooda ما سافر جيرانك بل خادمُهم .

8) لكنْ: Hase ahaatee sida: Ma socdaalin ardadii hase ahaatee qof ka socdey iyaga (لم يسافر الطلابُ لكنْ وكيلُهم).

9) لا: Ma aha sida: Waxaa guuleystey Maxamuud ee ma aha Saliim (نجح محمودٌ لا سليمٌ).

4- Fasirtada البدل

Fasirtada waa sida: Martigaaga maanta waa deriskaaga Khaalid ضيفُك اليوم جارُك خالد.

5- Lasocotada caddaynta عطف البيان

Lasocotada caddaynta waa sida: جاءَ خالدٌ التميميُّ معه أبو زيد عمرانُ.

Xarfaha macnayaalkooda حروف المعاني
Ka hadalka xarafka الكلام على الحرف

Xarfaha oo dhami waa ismabadalayaal مبنية wayna yar yihiin oo kama badna tiradooda siddeetan. Waxaana loogu yeeraa xarfaha macnayaalka, sidoo kale xarfaha alif ba'da حروف الهجاء waxaa loogu yeeraa xarfaha aan isbadalin. Xarfaha macnayaalkooda waxay u kala baxaan shan qaybood: hal xarafle, laba xarafle, saddax

xarafle, afar xarafle, iyo shan xarafle. Hal xarafluhu waa saddax iyo toban xaraf waxayna kala yihiin: Hamzada, alifka, ba'da, ta'da, siin, fa', kaaf, laam, miim, nuun, ha', woow iyo ya'.

(الهمزة): Alif gaabka waxaa loo adeegsadaa weydiinta, isla simidda iyo dhawaaqtada sida: Ma dhow yahay mise wuu fog yahay waxa la idiin yaboohay {أَقَرِيبٌ أَمْ بَعِيدٌ ما تُوعَدُونَ}, waa isugu mid iyaga haddaad u digto iyo haddaadan u digin rumeyn mahayaan { وَسَواءٌ عَلَيْهِمْ أَأَنْذَرْتَهُمْ أَمْ لَمْ تُنْذِرْهُمْ لا يُؤْمِنُونَ} iyo deriskeenayahey annaga labada ah waxaanu deggannahay halkani إنا مقيمان ها هنا أجارتَنا.

(الألف) Kaalmada, layaabidda, baroordiiqqa, kala qaybinta labada nuun, sumadda laboodlaha sida: Alla Yaziidow waxaan kaa filayaa inaan kaa heli doono saddaqo (يا يزيدا لآملِ نيل بر), maxaa biyo ah oo maxaa cows ah! يا ماءا ويا عشبا!

(الباء) Dhejinta, darteedda, dhaarta, kaalmada sida: Waxaan qabtey walaalkey أمسكت بأخي , ka bixitaanka balamohoodii ayaanu naxariista uga fogeyney {فَبِما نَقْضِهِمْ مِيثاقَهُمْ لَعَنّاهُمْ} ,

(التاء) Dheddiga, dhaarta sida: Waxay tiri xaaskii mudanaha {قالَتِ امْرَأَةُ الْعَزِيزِ}, waxaan ku dhaartay Eebbe runtii Eebbaa naga kaa doortay { تَاللَّهِ لَقَدْ آثَرَكَ اللَّهُ عَلَيْنا}.

(السين) Timaadada sida: Waxaa kuu muuqan doonto (maalin ka mid ah) maalmaha waxaadan ogeyn ستبدي لك الأيام ما كنت جاهلا.

(الفاء) Isku xigidda, ku xiran sida: Madaxweynaha waxaa u soo galey aqoonyahanadii ka dib madaxdii دخل عند الخليفة العلماء فالأمراء, haddaad jeceshihiin Eebbe waa inaad isoo raacdaan { إِنْ كُنْتُمْ تُحِبُّونَ اللَّهَ فَاتَّبِعُونِي}. Waxay noqotaa xaraf dheeraad ah iyadoo erayga qurxineysa sida: Qaado toddobo oo kaliya خذ سبعة فقط.

(الكاف) Sidii sida: Aqoonta waa iftiin oo kale العلم كالنور, kaasi waxaa (idin kugu) sugan waano { إِنَّ فِي ذَلِكَ لَعِبْرَةً}, waxay noqotaa xaraf dheeraad ah sida ma jiraan wax la mid ah {لَيْسَ كَمِثْلِهِ شَيْءٌ}.

(اللام) Fartada, bilaabidda, dhaarta, u goonida sida: Ha bixiyo xoololow xoolihiisa { لِيُنْفِقْ ذُو سَعَةٍ مِنْ سَعَتِهِ}, jannada (beerta) waxay gooni u tahay kuwa maqla (Eebbe) الجنة للطائعين.

(الميم) Waxay tilmaantaa kooxda labka sida: Waxaad ahaydeen kuwa islaweyn adduunka { بِمَا كُنْتُمْ تَسْتَكْبِرُونَ فِي الأَرْضِ}

(النون) Ka tegin iyo xoojinta sida: Wuxuu igula dardaarmey tukashada {وَأَوْصانِي بِالصَّلاةِ} iyo waxaanu qaban foodiisa {لَنَسْفَعاً بِالنّاصِيَةِ}.

(الهاء) Hadal istaajinta sida: Maxaa ugu wacan لِمَهْ, isaga إياه magac uyaalka isaga waa (إيا) kaliya

hase ahaatee ha'da ka dambeysa waxay sheegeysaa qof maqan.
(الواو) Kooxda, sii wadida, qaabka, lasocdaha iyo dhaarta sida inaan idiin caddayno oon ku sugno ilmagaleenada wixii aan doono { لِنُبَيِّنَ لَكُمْ وَنُقِرُّ فِي الأَرْحامِ ما نَشاءُ}, waxay ka baxeen guryahooda iyagoo kummanaan ah {خَرَجُوا مِنْ دِيارِهِمْ وَهُمْ أُلُوفٌ}, iyo waxaan ku dhaartey Tiinka iyo Zaytuunka {وَالتِّينِ وَالزَّيْتُونِ} "labadan geed ma aha geedaha ay soomaalidu u taqaano Tiitiinka iyo Zeytuunka ee waa laba geedoo kale oo magacyadooda uun baa isku mid noqday".
(الياء) Hadlaha sida aniga إياي .
(أما الثنائية) Laba xarafluhuna waa lix iyo labaatan waxayna kala yihiin aa, iz, al, am, an, in, aw, ay, ii, bal, can, fii, qad, key, laa, lam, lan, low, maa, muz, min, haa, hal, waa, yaa iyo nuunka culus.
(آ) Dhawaaqtada sida Cabdullaahiyow آعبدَ الله .
(إذ) Isla markiiba iyo kolkii.
(أل) Qodobka gartada "ka" sida: Wuxuu idiin la yimaado rasuulka qaata {وَما آتاكُمُ الرَّسُولُ فَخُذُوهُ}.
(أم) Mise sida: Ma dhow yahay mise wuu fog yahay waxa la idiin balanqaaday { أَقَرِيبٌ أَمْ بَعِيدٌ ما تُوعَدُونَ}.
(أن) Fasirtada "in" sida: Inaad soontaan ayaa idiin wanaagsan {وَأَنْ تَصُومُوا خَيْرٌ لَكُمْ}.

(إن) Shardiga "haddii" sida: Haddii aad naxariisato waa laguu naxariisan إن ترحم تُرْحَم .
(أو) Ama sida: Qaado kan ama kaas خذ هذا أو ذاك .
(أي) Dhawaaqtada iyo fasiridda sida iBarbaariyaheygow أيْ رب , kaasi waa casjad yacni dahab هذا عسجد أي ذهب.
(إي) Haa sida: Waxay ku weydiinayaan ma dhabbaa waxaad dhahdaa haa waxaan ku dhaartey iBarbaariyaheyga ee runtii waa dhab {وَيَسْتَنْبِئُونَكَ أَحَقٌّ هُوَ قُلْ إِي وَرَبِّي إِنَّهُ لَحَقٌّ}.
(بل) "Ee waa" sida: Ma bixin Khaalid ee waa Yuusuf ما ذهب خالد بل يوسف .
(عن) "Ka" sida: Waxaan ka baxay magaaladii خرجتُ عن البلد .
(في) Falkaab, lasocotada iyo darteed: Magaalada waxaa jooga tuugo في البلد لصوص ,
(قد) Runtii iyo lagayaabo sida: Runtii waxaa liibaaney {قَدْ أَفْلَحَ}.
(كي) "Si" sida: Si aad u gaartaan كي تنالوا .
(لا) Diidada, dheeradka iyo diidmada sida: Ha ka quusanina naxariista Eebbe {لا تَقْنَطُوا مِنْ رَحْمَةِ اللَّهِ}, maxaa kuu diidey inaad tukatid {ما مَنَعَكَ أَلاَّ تَسْجُدَ} iyo xoolana ma bixiyo mana tukado {فَلا صَدَّقَ وَلا صَلَّى}
(لم) Diidmada joogtada sida: Lama dhalin waxna ma dhalo "Eebbe" {لَمْ يَلِدْ وَلَمْ يُولَدْ}.

(لن) Diidmada joogtada iyo timaadada.
(لو) Shardiga "haddii" sida: Wuxuu jecel yahay midkood hadduu noolaan lahaa kun sano { يَوَدُّ أَحَدُهُمْ لَوْ يُعَمَّرُ أَلْفَ سَنَةٍ}.
(ما) Diidmada sida: Kani ma aha dad {ما هَذا بَشَراً}.
(مذ) Tan iyo sida: Lama aanan hadlin tan iyo sanad ما كلمتُه مذ سنة .
(من) Bilaabidda "ka", qaar .
(ها) Soojeedinta waxaana qaata magacyada muujiyaha sida: kan هذا iyo tan هذه magac uyaalada waa aniga kani هأنذا iyo waa idinkii هأنتم iyo weerooyinka sida: War saaxiibkaa ayaa taagan iridda ها إنّ صاحبك بالباب.
(هل) Weydiinta sida: Waagii ma beryay ? هل طلع النهار؟
(وا) Baroordiiqa
(يا) Dhawaaqtada, baroordiiqa iyo soojeedinta sida dadow ((يأيها النّاس)),
(النون الثقيلة) Waxaa qaata falka laxoojinaya sida: Waa la xiri {لَيُسْجَنَنَّ} sideedaba ma qaadato tagtada.
(أما الثلاثية) Saddax xarafluhuna waa labaatan iyo shan waxayna kala yihiin aay, ajal, izaa, izan, alaa, ilaa, amaa, inna, anna, ayaa, balaa, zumma, jalal, jayri, khalaa, rubba, sowfa, cadaa, calla, calaa, laata, layta, munzu, nacam iyo hayaa.

(آيَ) Dhawaaqtada
(أجل) Haa
(إذا) Islamarkii sida: Haddii ay ku dhacdo xumaan oo ay gacantooda ku keensadeen islamarkiiba waa kuwa rajadhiga { وَإِنْ تُصِبْهُمْ سَيِّئَةٌ بِما قَدَّمَتْ أَيْدِيهِمْ إِذا هُمْ يَقْنَطُونَ}.
(إذن) Sidaas darteed.
(ألا) Soojeedinta "hooyaay"
(إلى) Dhamaadka "ku" .
(أمَا) Soojeedinta "miyaa"
(أنّ) Xoojinta "runtii"
(إنَّ) Xoojinta sida: Runtii Eebbe ayaa wax walba awooda {إِنَّ اللَّهَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ}, kaliya إنَّما sida waxaa kaliya oo waano qaata inta garaadka leh {إِنَّما يَتَذَكَّرُ أُولُو الأَلْبابِ}.
(أيَا) Dhawaaqtada
(بلى) Warcelinta "haa"
(ثم) Dabadeed sida waxaa baxay dhalinyaradii ka dibna odayaashii خرج الشبان ثم الشيوخ
(جَلْ) Warcelinta "haa" oo kale
(جَيْرِ) Warcelinta "haa" sidoo kale
(خلا) Ka baxsanida "ka ahayn"
(رُبّ) Lagayaabo.
(سوف) Timaadada sida: Wuu arki doonaa سوف يرى
(عدا) Ka baxsanida "ka ahayn"

(علَّ) Laga yaabo
(على) Korka iyo lasocotada
(لاتَ) Diidmada ma aha
(ليت) Filasho "tollaay"
(منذ) Tan iyo sida: Lama aanan hadlin tan iyo sanad ما كلمتُه منذ سنة .
(نعمْ) Warcelinta "haa"
(هيا) Dhawaaqtada sida: Na Barbaariyeheenow noo naxariiso هيا ربَّنا ارحمنا
(وأما الرباعية) Afar xarafluhuna waa shan iyo toban waxayna kala yihiin izmaa, allaa, illaa, ammaa, immaa, xaashaa, xattaa, ka'anna, kallaa, laakin, lacalla, lammaa, lowlaa, lowmaa iyo hallaa
(إذما) Shardiga "haddii" .
(ألاَ) Ku boorinta.
(إلا) Ka baxsanida "ka ahayn" sida: Cudur kasta wuxuu leeyahay daawo waxaan ka ahayn geerida لكل داء دواء إلا الموت .
(أما) Miyaa sida: Kuwii rumeeyey miyaa iyagu way og yihiin runtii inuu dhab yahay { فَأَمَّا الَّذِينَ آمَنُوا فَيَعْلَمُونَ أَنَّهُ الْحَقُّ}.
(إمّا) Ama.
(حاشا) Ka baxsanida "ka ahayn"
(حتى) Tan iyo intii sida: Tan iyo intii waaga ka baryayo {حَتَّى مَطْلَعِ الْفَجْرِ}.
(كأنّ) Sidii.

(كلا) Sidaas ma aha.
(لكنْ) Hase ahaatee sida: Ma istaagin Zeyd hase ahaatee Camri buu ahaa ما قام زيد لكن عمروٌ
(لعل) Laga yaabo sida: Waxaa laga yaabaa hawada iney isbadasho لعل الجو يعتدل .
(لمّا) Diidmada joogtada
(لولا) Ku boorinta.
(لوما) Ku boorinta.
(هلا) Ku boorinta.
(أما الخماسية) Shan xarafluhuna waa hase ahaatee sida: Ma aydan dilin hase ahaatee ee Eebbaa dilay {فَلَمْ تَقْتُلُوهُمْ وَلَكِنَّ اللَّهَ قَتَلَهُمْ}.
(أحرف الجواب) Xarfaha warcelinta لا ونعَمْ وبلى وإي وأجَلْ وجلَلْ وجَيْر وإنّ
(أحرف النفي) Xarfaha diidmada لم ولمّا ولن وما ولا ولات
(أحرف الشرط) Xarfaha shardiga إنْ وإذما ولو ولولا ولوما وأمّا
(أحرف التحضيض) Xarfaha ku boorinta ألا وألاّ وهلاّ ولولا ولو ما
(الأحرف المصدرية) Xarfaha magac faleedka أنّ وأن وكي ولو وما
(أحرف الاستقبال) Xarfaha timaadada السين وسوف وأنْ وإنْ ولن وهل
(أحرف التنبيه) Xarfaha soojeedinta ألا وإما وها ويا
(أحرف التوكيد) Xarfaha xoojinta إنّ وأنّ والنون ولام

الابتداء وقد .

Isbadalka shaqalka erayga u dambeeya ee weeraha إعراب الجمل

Weerta eraybixinta naxwaha waxa weeye wixii ka kooban sheegtada مسند iyo yeelaha مسند إليه haddii ay tahay weer dhan sida: Wuu cuney ilmihii (أكل الطفلُ) ama aysan ahayn weer dhan sida: Haddaad dadaasho (إن تجتهد).
Weerta falka iyo tan magaca ah الفعلية والاسمية:
Weerta ku bilaabata fal sida: Waxaan aqriyey casharkeygii (قرأت درسي) waxaa la yiraahdaa weer fal.
Weerta aan ku bilaabanna fal waxaa la yiraahdaa weer magac sida: Ma aha walaalkaa socdaale (ما أخوك مسافراً).

الحمد لله الذي بنعمته تتم الصالحات

Waxaa mahad iska leh Eebbe kaa soo galadiisu ku dhammaadaan wanaagyaalku.